

Bas kuu imaanaya!

Ku xidhnoow Metro micro.
Waxay joogaan xaafadaada.

Metro micro waa adeeg gaadiid la isla raaco oo la awoodi karo, lana heli karo kaas oo kuu ogolaanaya inuu kugu xidho waddooyinka gaadiidka jira ama aad qasho safar lagugu geynayo gurigaaga iridiisa markaad ku safrayso degaanka Bloomington, oo ay ku jiraan ku xiritaanka METRO Orange Line barta I-35W & 98th Street Station.

Metro Micro waxay isku darsatay raaxada iyo fududaynta safarka gaadhiga gaarka ah iyo qiimaha jaban iyo hufnaanta gaadiidka dadweynaha ee la wadaago.

WAY FUDUDAHAY IN LA ISTICMAALO:

Si fudud u balanso safar adiga oo soo degsanaya ablikeeshinka Metro micro ama adigoo wacaya telefanka 651-602-1170.

Waxaan kuu raadin doonaa bas-yaraha ugu dhow wakhtiga saxda ah, si lagugu soo qaado iyo si laguugu dejiyo meel kasta oo ka tirsan deegaanka lagu bixiyo adeega.

SAACADAHA LA SHAQEYO:

Isniin-Jimco: 5:30 a.m. – 10:30 p.m.

Sabtida iyo Axadda: 7 a.m. – 10:30 p.m.

WAA LA AWOODI KARAA:

Nooligu waa \$2.50/\$3.25, iyadoo ku xiran xilliga maalinta ee la raacayo. Ku bixi lacag cadaan ah, kaarka Go-To Card, ama ablikeeshinka Metro Transit. U beddelashada basaska, oo ay ku jiraan METRO Orange Line, iyo tareenada waa lacag la'aan.

SIDA AY U SHAQEYSO

- Ka soo degso ablikeeshinka Metro micro barta App Store ama Google Play. Ma haysatid miyaa telefanada casriga ah? Wac 651-602-1170
- Ku sameyso akoon telefan lambarkaaga iyo ciwaankaaga iimaylka
- Qabso waqtiga aad safrayso, ha lagu soo qaado, kadibna aad meel kasta oo ka tirsan deegaanka lagu bixiyo adeega

